

Isku Xirka Bulshada

Mashruuca Basaska Biraha Ku Socda ee Casriga Ah waa mid loogu talo galay inuu isku xiro gaadiidka maraya Galbeedka Wadada 7aad, xaafadaha, goobaha dalxiiska iyo shaqaalaha faras magaalaha St. Paul, garoonka caalamiga ah ee diyaaradaha ee Minneapolis-St. Paul (MSP) iyo Mall of America™, kaasoo dhameystiraya sadex geesoodka isku xiran. Taasii waxa ay kordhineysaa qiimaha guryaha, xoojineysaa horumarinta gaadiidka iyo sidoo kale horumarineysaa gaaritaanka bulshada ee goobaha lagu madadaasho. dhismahaasi waxa uu dhaqaale fara badan soo gelinayaa dhaqaalaha degaanka.

Habka gaadiidka looga raaco loogana dago ayaa wadada ka dhigeysa in ay dadku doortaan sida ay ugu soconayaan taasoo siineysa fursad ay waayo aragnimo wanaagsan oo ku reebta xusuus ay kala kulmaan magaalada.

Wadooyinka Basaska Biraha Ku Socda ee Casriga Ah waa mid ku haboon isku xirka inta u dhaxeysa goobaha, iyo fursad u sabab noqon karta in dalxiisayaashu iyo dadka "degaanku ku lumaan" iyada oo goobtu ku haboon tahay damaashaadka iyo dhulka wabiga jiinkiisa ah, xaafadaha Saint Paul ee dhaqdhaqaaqu ka jiro sida Union Depo, iyo xarunta Xcel iyo dhulka taariikhiga ah ee Bdote/Fort Snelling. Inuu si toos ah isugu xiro gegida diyaaradaha ee caalamiga ah taasoo ka dhigeysa mid soo jiidata dad badan oo soo booqda Saint Paul, dhiiri gelisa dalxiiska iyo kulamada heer gobol ee lagu qabanayo goobaha xiisaha badan.

Ma aha in dib u dhis iyo dayactir lagu sameynayo wadada 12ka meyl ah ee dadku ugu socodka badan yahay, waa mid u taagan dariiqada lagu gaari karo horumarinta bulshada, dhaqaalaha iyo degaanka. Dib u dayactirkaas lagu sameynayo waxa ay qeyb ka tahay miisaaniyadda mashruuca iyo si wadajir ay uga qeyb qaadanayaan hay'adaha ka wada shaqeynaya si loo yareeyo saameynta dhismaha.

In ka badan toban sano, xubnaha bulshada iyo kuwa ka qeyb qaadanaya ayaa nala wadaagaya waayo aragnimada ay kala kulmaan, dareenka ay qabaan iyo baahida loo qabo dadaalka lagu horumarinayo dhulka hormara Wabiga Jiinkiisa. Maalgelinta 2.1 bilyanka ah ee bulshada iyo dariiqada lagu gaari karo koritaanka mustaqbalka oo nagu hogaamin karta dhaqaale xoog iyo isku xirka magaaloyinka mataanaha ah.



Kala bar kharashka mashruuca, kaasoo ku dhow \$1 bilyan, waxa ay keeneysaa natiijo wanaagsan oo laga gaaro muuqaalka wabiga ee Basaska Biraha Ku Socda, sida \$535 milyan ee lagu horumarinayo wadooyinka xaafadaha St. Paul iyo \$415 milyan ee dhismaha buundada cusub ee u taagan qarnigii la soo dhaafay. Sidoo kale, \$285 milyan ayaa loo qoondeeyey abuuritaanka xarunta ee basaska laga raaco ee Mall of America™ taasoo ay ka faa'iideysanayaan dadka isticmaala METRO Blue Line iminka jira kaasoo yareynaya isku xiranka gaariga ee Bloomington.

Dib u Dhiska Galbeedka Wadada 7aad

Waxaa la tilmaamay oo la aqoonsaday wadooyinka la maal gelinayo iyo jadwalka MnDOT ee 2028/2029, iyo waqtiga xadidan ee dib u dhiska wadada. Mashruuca Basaska Biraha Ku Socda waxa uu xoojinayaa maalgelinta waddo lugeedka Galbeedka Wadada 7aad, oo ay ka mid tahay wax ka bedelka waddo lugeedka iyo halka looga baxo wadooyinka taasoo Galbeedka Wadada 7aad ka dhigeysa mid amaan ah. Waxa kale oo ay bedeysaa naqshadda wadada si ay ula jaanqaado gaadiidka iyo waayo aragnimada dadka lugeynaya.



Buundada Highway 5 (Laga talaabo wabiga Mississippi)

Buundada dul marta wadada Mississippi (la dhisay 1961) waa mid ay ka dhiman yihiin goobo laga galo iyo hab casri ah oo ay isugu xirto. Mashruuca Basaska Biraha Ku Socda waxa uu siinayaa fursad wax lagaga qabto caqabadaha hor taagan isku xirka dadka degan Hennepin iyo Ramsey ee ka soo baxa Shuruudaha Sharciyada Dadka Naafada Ah (ADA)-buundo sharcigaas waafaqsan ee dhinaca sare ee lagu talinayo taasoo laga helayo waddo lugeedka iyo bushkuleetiyaada, la yareeyo meeshana laga saaro caqabadaha sida jaranjarooyinka lana abuurto dhul ay bulshadu ku qabsato xafadaha dhaqanka.

Xarunta Basaska ee Dhulka Taariikhiga Ah Bdote/Historic Snelling

Xaruntan cusub waxa ay si toos ah ugu xireysaa dadka booqanaya xarunta taariikhiga ah ee Fort Snelling iyo Goobta Xusuusta ee Dakota, iyada oo la horumariyey isku xirta Xarunta Fort Snelling Chapel iyo goobaha ku hareereysan. Talo soo jeedinta Qabiilada ee ka talowga wabiga iyo halka loo marayo goobta taariikhiga ah ee Bdote/Fort Snelling ee naqshadda mashruuca ee isla goobtaas.

Isku Xirka Tooska Ah ee METRO Blue Line iyo Gegidda Dayuuradaha Ee MSP

Iyada oo si toos ah loogu xiray khadka Metro Blue Line kan iminka jira ee xarunta Fort Snelling kuwaas oo ku bedelanaya gaadiidka u socda xaafadaha iyo faras magaalaha Minneapolis. Waxaa intaas dheer, taasi waxa ay yareneysaa kharashka mashruuca ka dib marka la isticmaalo khadka tareenada ee iminka jira ee gegida 1 iyo gegida 2.

Xarunta Mall of America™

Dhismaha xarunta kor loo qaaday ee MOA waxa ay u adeegeysaa khadka METRO Blue Line, taasoo yareneysa waqtiga ay ku qaadata dadka raaca METRO Blue Line iyada oo sidoo kale u sabab noqoneysa dhismayaal cusub oo laga hirgeliyo agagaarka dhulka ku dhagan moolka. Waxa ay wanaajineysaa amaanka iyada oo yareneysa isku xiranka gaadiidka ka dib marka Khadka Blue Line laga saaro isgoyska Wadada Killebrew iyo 24aad.



American Blvd

Bloomington Central

30th Ave

Mall of America™

Basaska Biraha Ku Socda waxaa loo aqoonsaday mid aad degaanka looga jecel yahay (LPA) sanadkii 2017 iyada oo lagu daray Nidaamka Qorshaha U Degsan maamulka Magaaloyinka sanadkii 2019. Kooxda qaabilsan hirgelinta mashruuca waxa ay iminka ka shaqeynayaan sidii wadooyinka loogu diyaarin lahaa Basaska Biraha Ku Socda iyo xarumihii laga raaci lahaa, bilowga qodobada aasaaska u ah injineeriyadda mashruuca sida ka talowga wabiga iyo qiimeynta waxyaabaha la xiriira degaanka.

Canshuurta iibka ee degaanka waxaa loo adeegsanayaa in lagu bixiyo qeybta Degmada Ramsey ee gaadiidka casriga ah iyada oo lacag kale oo dheeraad ah ay ka imaanayso dawladda federaalka iyo gobolka, iyo sidoo kale Degmada Hennepin.



Mashruuca Basaska Biraha Ku Socda Ee Casriga Ah

Mashruuca Basaska Biraha Ku Socda ee Casriga Ah waa mid ka duwan mashruucyada gaadiidka ee caadiga ah. Waa fursad looga faa'iideysan karo maal gelinta dib u casriyeynta Wadada 7aad, iyo dhulka taariikhiga ah ee wabiga looga talaabo ee dib u qaabeynta suurogalka ah ee Galbeedka Wadada 7^{aad} ee Saint Paul iyo Bloomington.

AAN KU DHAQQAQNO!

Mashruuca Basaska Biraha Ku Socda Ee Casriga Ah

Waxaa Hirgelinaya Dawladda Federaalka Ah Qiyaasta 2025-2026

Injineerada Qiyaasta 2027-2030

Dhismaha Qiyaasta 2030-2033

Khadka waxa uu furmayaa Qiyaastii dhamaadka 2033



Hirgelinta Basaska Biraha Ku Socda: Barbaarin Dhaqaale iyo qiimaha guryaha oo kor u kaca

Basaska Biraha Ku Socda dadka oo kaliya ma daabulaan—waxa kale oo ay abuuraa dhaqaale aan caqli gal aheyn oo bulshada dib hor u marin iyo dib u maalgelin loogu sameyn karo. Bulshada ku dhaqan Waqooyiga Ameerika waxa ay hirgeliyeen habka ku noolaashaha magaalada kaasoo si balaaran looga faa'iideystay horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada. Anaguna waa sameyn karnaa sidoo kale.

Mashruucu waxa uu dardar iyo nolol gelinayaa dhulka uu marayo iyo hawl kasta oo aan ka qabaneyno. Waxa uu kordhinayaa 2,200 oo guryo la dego ah iyo ilaa 220,000 oo dhudhun oo laba jibaar ah ee goobaha ganacsiga ee St. Paul.

Basaska Biraha Ku Socda waxa uu soo jiitaa ganacsatada, xaafadaha, iyo bulshada soo booqaneysa, taasoo ka dhigeysa meel lagu qabto kulamada, ciyaaraha, shirarka iyo dadka dalxiisaya. Iyada oo khadka uu yahay mid isku xiraya faras magaalaha, gegida diyaaradaha, iyo Mall of America™, waa hab dalxiisayaashu ku booqan karaan dhul qurux badan dalxiiskana ku wanaagsan.

Sida laga soo xigtay daraasad dhaqaalaha ee dhawaanta la sameeyey, mashruuca Basaska Biraha Ku Socda ee hor mara Wabiga Jiinkiisa waxa uu ku kordhinayaa

\$843 milyan ee qiimaha hantida ma guurtada ee magaalada St. Paul

taasoo ay ugu wacan tahay korodhka dhaqdhaqaaqa guryaha degaanka ah iyo kuwa ganacsiga. Taasi waa mid dheeraad ku ah horumarinta isku xirka bulshada, isu socodka, ku kalsoonaanta gaadiidka dadweynaha iyo amaanka.



Waxa uu bedel noqon karaa: Khadka Basaska Dheereeya (ABRT):

Iyada oo loo marayo nidaamka qorsheynta, hay'adaha ka qeyb qaadanaya ayaa ogaaday in ABRT ay tahay nidaamka basaska ee ugu haboon iyada oo ujeedadu tahay in la isla barbar dhigo waayo waxaa yar saameynta ay ku yeelaneyso guryaha ku yaal degaanka. Habka bedelka u noqon kara waxa uu ku kacayaa \$121 milyan taasoo ku saleysan furitaanka 2030. Mashruuca waxaa qeyb ka ah hagaajinta waddo lugeedyada ku hareereysan xarunta basaska laga raaco iyo muhiimad siinta nalalka wadooyinka ee khadka ay marayaan, iyo sidoo kale basas ay yar tahay washkooowga hawada ee ay dhaliyaan.

Khadka ABRT ee lagu talinayo waa mid wax yar ka gaaban khadka Basaska Biraha Ku Socda ee wabiga Jiinkiisa kuma jiraan gegida diyaaradaha ee MSP Gegida 2, Goobaha taariikhiga ah ee Fort Snelling ama Bdote/Fort Snelling. Waxaa la qiyaasayaa dadka raacaya maalin kasta in ay gaaraan 8,000 oo qof sanadka 2040.

Daraasad dhaqaalaha ee dhawaanta la sameeyey, ABRT waxa uu ku kordhinayaa \$336 milyan ee qiimaha hantida ma guurtada ee magaalada St. Paul isaga oo guryaha magaalada ku kordhinayaa 600 oo guri iyo 60,000 dhudhun oo laba jibaar ah ee kuwa ganacsiga ah.

Faa'iidada basaska biraha ku socda iyo xarumaha laga raaco



Degaanka

Waxa ay yareneysaa raadka kaarboonka waayo isticmaalka buuxa ee korontada wax wasakh ah kuma darayo hawada.



Helitaanka

Goobaha basaska laga raaco waa kuwo la siman waddo lugeedyada; goob cusub oo wabiga laga talaabo ayaa fududeysa gaaritaanka iyo isu socodka bulshada taasoo dib isugu xireysa bulshada.



Xajmiga-saxa ah

Waxaa ka talaaba in ka badan inta basaska raacda, waa kuwo ka yar tareenada iminka jira ee LRT kuwaas oo si haboon ugu adeega xaafadaha.



Tirada Dadka Raaca

Waxaa maalintii raacaya qiyaastii 11,200-11,600 oo qof (waa qiyaasta 2040)



Horumarinta Amaanka

Waxa ay xoojineysaa waddo lugeedka iyo bushkuleetiyaada oo la balaariyey, dhul cagaaran, isgoysyo leh nalal haga, iyo dhul amaan ah; waxa ay dhiiri gelineysaa oo farsamada casriga ah iyo nalal ku filan, oo ku dhereran Galbeedka Wadada 7aad.



Jecelysiga

Waa mid ay dadku raacaan iyada oo la kulmim isku xiranka gaadiidka, oo wadada loo baneenayo basaska.



Dhaqanka

Barnaamijiyada dhiiri gelinta bulshada iyo dhaqanka.



Ku haboon

Waxa ay wanaajisaa horumarinta iyo ku kalsoonaanta calaamadaha ee farsamada casriga ah iyo khadka ay maraan gaadiida dadweynaha.



Ka qeyb qaado!



RiverviewCorridor.com
info@RiverviewCorridor.com
facebook.com/RiverviewCorridor
x.com/RiverviewLine

Nala wadaag fikradaada ee horumarinta gaadiidka dadweynaha ee la soo jeediyey ee goobaha aan ka hadalnay. Soo booqo bogeenna internetka iyo baraha bulshada ee ka qeyb gelinta dadweynaha ee xagaaga iyo kuleylaha.

Waxaanu qaban doonaa kulamo dhawr ah oo dadweynaha u furan, ka qeybgal kulmada bulshada inaga oo wacyi gelin gaarsiin doona goobaha ganacsiga, deganayaasha iyo dadka raaca gaadiidka dadweynaha.

Habka ka qeyb gelinta baraha bulshada waxaa ka mid ah khariidad wax laga bedbedli karo oo barta internetka ah, xogtii u dambaysay oo lagu soo gudbiyo baraha internetka, iimeyl iyo sahanka dadweynaha. Soo booqo RiverviewCorridor.com si aad xog dheeraad ah u hesho.

Mudada ka qeyb gelinta dadweynaha, waxyaabaha aan ka ogaanay dadweynaha ayaa loo soo gudbiyaa madaxda taasoo lagu wargeliyo in horay loo sii wado oo lagu sameeyo qiimeyn xagga farsamada iyo injineernimada ah.

